

Xarunta Gurmadka Degdega ah ee Danbiyada

Seattle Police Department

Waa maxay Tiknoolajiyadu?

Softwareka Real-Time Crime Center (RTCC, Xarunta Gurmadka Degdega ah ee Danbiyada) ayaa bixisa goob dhexe oo laga helaayo xogta iyo qiimeynta degdega ah. Sida aasaaska u ah, softwareka RTCC ayaa isku keena gurmada, kaamirada (sida Kaamirooyinka Taleefishinka ee Isku Xiran iyo kamaradaha la socodka taraafikada), goobta ciidanka, wicitaannada 911, nidaamka maareynta diiwaannada, iyo xogta kale oo la iskugu keenaayo "hal shaashad" (hal muuqaal). Softwareka waxaa loo adeegsadaa in looga digo shaqaalaha xarunta gurmada danbiyada dhacdada danbiyada xunxun, oo ay u arkaan xogta tooska ah oo ay uga jeedaan qariirada, iyo in xogta loo diro saraakiisha gurmada u tagaaya goobta.

Maxaan u isticmaaleynaa qalabka casriga ah?

Softwareka xarunta gurmada degdega ah ee danbiyada ayaa gacan ka gaysta inuu wacyi ka siiyo xaalada si loo kordhiyo badqabka ciidanka iyo dadwaynaha si dhakhso ahna loogu baaro xaalada. Helista xogta degdega ah, ee saxda ah oo hal goob ku wada jirta ayaa gacan ka gaysanaysa kordhinta isku halaynta helista goobta dhibaneyaasha iyo eedaysaneyaasha danbiyada, taasoo sahlaya gurmada degdega ah iyo soo qabashada amaanka ah. Helista xogta muuqaalka iyo maqalka ee eedaysanaha ayaa naga caawinaysa yareynta jag boyntiyada badan ee booliiska, ayagoo diirada ku saaraaya dedaaladooda goobaha la xaqiijiyay iyo qeexitaannada saxda ah.



Waqtiga ay furanyihiin fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabka ayaa hada socda. Waxaad faallooyin ku bixin kartaa [Seattle.gov/Surveillance](https://seattle.gov/surveillance).

Faallooyinka dhammaan waxaa lagu dari doonaa Surveillance Impact Report (Warbixinta Saameynta Dabagalka) ee qalabkan waxaana loo gudbinayaa Dawlada Hoose.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso jawaab celin xili ka baxsan xiliga u furan faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Dawlada Hoose adoo adeegsanaaya iimaylka ah <https://seattle.gov/council>.

Uruurinta

Softwareka RTCC wuxuu xogta isku dhafan ee ka timaada nidaamyada kale sida Closed-Circuit Television Cameras (CCTV, Kaamirooyinka Taleefishinka ee Isku Xiran), kamaradaha la socodka taraafikada ee Seattle Department of Transportation (SDOT, Waaxda Gaadiidka Seattle), Automated License Plate Readers (ALPR, Agabka Otomaatiga ah ee Akhriya Taargada Gaariga), Records Management System (RMS, Nidaamyada Maareynta Diwaannada), gurmada, Geographic Information System (GIS, Nidaamka Xogta Goobta Deegaanka), iyo wicitaannada 911 u diraa hal meel si loo helo xogta degdega ah iyo qiimaynta.

Gelitaanka nidaamyada iyo tignooloojiyada ayaa ku kooban shaqaalaha loo ogol yahay ayagoo adeegsanaaya xogta gelitaanka baasaweerka ku shaqeyso.

Isticmaalka

Softwareka RTCC ayaa loo adeegsadaa si loogu dhafo ilaha xogta horey u jirtay ay isticmaasho SPD iyo sidoo kale nidaamyada kale oo aysan maamulin Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska Seattle) sida kamaradaha taraafikada ee SDOT.

Ujeedada RTCC waa in wacyiga goobta la siiyo si loo kordhiyo badqabka sarkaalka iyo bulshada, loona abuuro baaritaanka dhacdooyinka si degdeg ah.

Ilaalinta Amniga

Kaliya shaqaalaha fasaxa uhaysta oo katirsan SPD iyo OIG ayaa isticmaali kara softwareka RTCC. Gelitaanka nidaamka/tignooloojiyada ayaa ku kooban shaqaalaha loo ogol yahay ayagoo adeegsanaaya xogta gelitaanka baasaweerka ku shaqeyso.

Xogta ku jirta nidaamka RTCC waxaa keliya loo eegi karaa ama loola bixi karaa ujeedooyinka sharci fulinta keliya, sida ku cad SPD Policy 12.050 (Shuruucda Waaxda Booliska Seattle ee 12.050). Muddada la haynaayo waxaa go'aamiya in xogtu leedahay muhiimad cadeyn iyo inkale. Xogta aan lahayn muhiimad cadeyn ayaa la tirtiraa muddo 30 maalmood kadib.



City of Seattle